# Waa maxay WIDA Alternate Screener?

WIDA Alternate Screener waa imtixaan lagu galo qalin iyo warqad oo ka caawiya macallimiinta in ay ogaadaan haddii ardayda leh naafonimada garaadka ee ugu culus ee fasallada K–12 ay yihiin arday Baranaya af Ingiriis. Ardayga baranaya af Ingiriis waa arday si rasmi ah loo aqoonsaday inuu u baahan yahay taageero luqadeed si uu si guul leh ugu fahmo una la jaanqaado maaddooyinka waxbarasho ee ku baxa af Ingiriisiga.

## Maxaa looga qaadayaa ilmahayga imtixaanka WIDA Alternate Screener?

Waxaad ka qayb gashay sahamin oo aad ka jawaabtay su'aalo ku saabsan luqadda aad kaga hadasho guriga. Marka la eego jawaabahaaga, macallimiinta carruurtaada waxay u maleynayaan in ilmahaagu laga yaabo inuu yahay arday baranaya af Ingiriis. Imahaagu wuxuu u sameenayaa WIDA Alternate Screener in lagu xaqiijiyo hadeey yihiin kuwa baranaya luuqada Ingiriisiga.

## Sidee Loo Adeegsadaa Natiijooyinka Imtixaanka WIDA Alternate Screener?

Natiijooyinka imtixaanka WIDA Alternate Screener waxaa adeegsada macallimiinta ilmahaaga si ay uga go'aan gaaraan haddii ilmahaagu yahay arday Baranaya af Ingiriis.

## Imtixaanka WIDA Alternate Screener muddadiisu waa intee?

Imtixaanku wuxuu qaadan karaa ilaa 30 daqiiqo in la dhammeeyo, inkastoo wakhtiga imtixaanku ay kala duwanaan karo iyadoo lagu saleynayo baahida ardayga. Waxaa jirta wadar ahaan sagaal su'aalood oo ku kala faafsan afarta qaybood ee luqadda: Dhageysi, Akhris, Hadal, iyo Qoris.



WIDA
UNIVERSITY OF WISCONSIN–MADISON

WIDA waxay ku taal Xarunta Cilmi-baarista Waxbarashada ee Wisconsin ee Jaamacadda Wisconsin-Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA

## U Diyaargarowga WIDA Alternate Screener

- Macallimiinta ilmahaaga waxaa laga yaabaa inay waydiiyaan su'aalo ku saabsan hababka wadahadaleed ee uu ilmahaagu doorbido iyo luqadda uu guriga ku isticmaalo.
- Ilmahaagu uma baahna inuu u diyaargaroobo imtixaanka WIDA Alternate Screener.
- Kala hadal macallimiinta ilmahaaga goorta aad heli doonto natiijooyinka imtixaanka iyo sida iskuulka ilmahaaga u adeegsado natiijooyinkaas.

## Haddii ilmahaagu yahay Barte Ingiriisi, Halkan waxaa ah su'aalo aad weydiin karto macalimiintooda




- Sidee bay noqon doontaa marka ilmaheygu helo adeegyo luqadeed iyo adeegyo waxbarasho oo gaar ah labadaba?
- Sidee baa luqadaha iyo dhaqamada carruurta loogu dhex-dhafaa dugsiga?
- Sidee qoyskaygu ugu taageeri karaan horumarinta luqadda ilmaheena guriga?
- Goorma ayuu ilmeygu joojin doonaa helitaanka taageerada luqadda Ingiriisiga?

WIDA™ UNIVERSITY OF WISCONSIN-MADISON

WIDA waxay ku taal Xarunta Cilmi-baarista Waxbarashada ee Wisconsin ee Jaamacadda Wisconsin-Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA